



## Qiimaynta MAP ee ardayda PPS waxa ay dhici doontaa 28 ka Sibteembar-23 ka Oktoobar

Waalidiinta iyo Koriyeyaasha PPS ee Sharafta leh,

Maadaama oo aanu ardayda ku soo dhawaynayno ku soo noqoshada sanad-dugsiyeedka cusub, waxa ah tallaabo muhiim u ah macallimiinta in ay fahmaan baahiyaha waxbarasho ee ugu muhiimsan ee ardaygaaga. Si loo ururiyo macluumaadkan muhiimka ah, ardaydu waxa ay qaadi doonaan tallaabooyin ah qiimaynta (MAP) ee Horumarka Waxbarasho. Qiimaynta MAP waa imtixaan khatarihiisu ay yar yihiin – tan macneheedu waxa weeyi in natijjooyinka aan loo adeegsan doonin dhibco siinta ardayda ama ujeedooyinka isla-xisaabtanka dugsiga.

Caadi ahaan, qiimaynta MAP waxa lagu qabtaa goobta fasalka laakiin, waxbarashada masaafadda ah awgeed, ardaydu waxa ay ku qaadan doonaan qiimayntan guriga. Imtixaan qaadistu waxa ay dhici doontaa inta u dhaxaysa 28 ka Sibteembar iyo 23 ka Oktoobar. Arday badan, gaar ahaan carruurta yaryar, waxa ay kaalmo uga baahan doonaan qof weyn oo jooga guriga. [Riix halkan](#) si aad dib ugu eegto hagaha waalidka ee ku saabsan qiimaynta. Macallinka ardaygaagu waxa uu bixin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan marka imtixaanka la bixin doono. Degmadu waxa ay adiga ku siin doontaa dhibcaha ardaygaaga wakhti uun ah Noofembar horraanteeda ama badhtankeeda.

Mahadsanid.

Waaxda Qorshaynta iyo Fulinta Nidaamka PPS